



PRSRT STD
U.S. POSTAGE
PAID
BOSTON, MA
PERMIT 53434
ECRWSS

Jaarka qaaliga ah,

Waraaqaha caleemaha ayaa dhacay oo hawaduna waxay leedahay qabow...taasoo ka dhigan in cimilada jiilaalka ee Boston ay soo dhow dahay. Si aad uga gudubto wax walba oo ka bilaabma waddooyinka barafka leh ilaa qabowga daran, waxaan diyaarinay hagitaan-kan si uu kaaga caawiyo adiga iyo qoyskaba inaad badbaado ku sii joogtaan xilligan.

Inaan bulshadeena nabad ku wada hayno waa masuuliyad wadajir ah. Fadlan u fiirso deriskaaga —gaar ahaan waayeeelka, dadka naafada ah, iyo cid kasta oo ay qabowgu si gaar ah u saamayn karto.

Haddii aad qabtid su'aalo aan degdeg ahayn ama walaac, wac 311 ama ku gudbi warbixin app-ka. Haddii ay xaalad degdeg ahi tahay, wac 911.

Wadajir, waxaan Boston uga dhigi karnaa guri qof walba u wanaagsan sanadka oo dhan.

Waxaan kuu rajeynayaa jiilaal nabdoon, caafimaad leh, oo farxad leh!

Michelle Wu

Michelle Wu
Duqa Magaalada Boston

*****ECRWSS*****
RESIDENT CUSTOMER
BOSTON, MA

NAMBARO MUHIIMAH

Wixii la xiriiira xaaladaha aan degdeg ahayn, wac
3-1-1 ama 617-635-4500

Wakaalada Biyaha &
Bulaacadaha ee Boston:
617-989-7000

Eversource:
800-592-2000

National Grid Gas:
800-322-3223

Verizon:
800-837-4966

ABarnaamijka ABCD ee
Caawimaada Shidaalka Kululeynta
Xiliga Jiilaalka:
617-357-6012

DCR:
617-626-4973

MassDOT:
857-368-6111

MBTA:
617-222-3200

Hagaha Cimilada Jiilaalka 2025-2026

CITY of BOSTON

Hagaha Cimilada Jiilaalka 2025-2026

Si aadula socoto xaaladaha degdega ah ee xilliyada uu barafka da'o, meelaha ay mamnuuca tahay in gawaarida lagu baakimo, wakhtiyada dib loo dhigo

- Booqo **[boston.gov/snow](https://www.boston.gov/snow)**
- Follow dheh **@CityofBoston**
- Halkaan **[boston.gov/alerts](https://www.boston.gov/alerts)** Iska diiwaan geli si aad u hesho digniinaha ay dad usoo diraan waaxaha Magaalada
- Moobeelka ku soo dejiso abka Boston 311



Hagahaan waxa laga heli karaa **[boston.gov/snow](https://www.boston.gov/snow)** oo ku qoran luuqadahaan:

Español | Af-Isbaanish
简体中文 | Af-Shiinees la
Fududeeyay
繁體中文 | Af-Shiineeskii Hore
Kreyòl ayisyen | Af-Haytiyaan
Kerool Português | Af-
Boortaqiiska Brazil

Af-Soomaali | Somali
Kriolu | Cabo Verdean Creole
Русский | Russian
Français | French
Tiếng Việt | Vietnamese
العربية | العربية

CITY of BOSTON

NADIIFINTA MARSHIBIYEEDYADA

Waxaan ka codsaneynaa dadka guryaha degan iyo milkiilayaasha ganacsiyada inay ka nadiifiyaan barafka cad, barafka sabiibaxa ah, iyo barafka caadiga ah marshibiyeedyada iyo meelaha lagu lugeeyo oo ku dhegan gurigaaga ama goobtaada ganacsi. Duufaanta ka dib, waxaa lagaa rabaa inaad nadiifiso meelahan:

- 3 saacadood gudahood marka baraf di'itaanka uu dhaamado, ama
- 3 saacadood ka dib waqtiga qorrax-soobaxa haddii uu baraf da'o habeenkii.

Ka saar barafka ilaa laamiga aad ka gaarto ama ka dhig meesha meel siman sida ugu macquulsan. Marshibiyeedyada waa in la nadiifiyaa si loogu sameeyo kuraasta gaariga ah ee curiyaamiinta iyo kuwa caruurto lagu wado ugu yaraan 1 mitir oo waddo ballac ahaan.

Code Enforcement Division (Waaxda Dhaqangelinta Xeerka) waxay ganaaxyo u soo saari doonaan dadka guraha dagan iyo milkiilayaasha ganacsiyada ee jabiya sharciyadaan. Ganaaxyada waxaa la soo saari karaa maalin walba ilaa laga saxo xad-gudubka sharciyada la sameeyay.

Ganaaxyada marshibiyeedyada aan la nadiifin waa sida soo socota:

- Goota ganacsiga: \$200
- Guriga la dagan yahay, ka kooban 16 qeybood ama wixii ka badan: \$100
- Guriga la dagan yahay: \$50

QABOWGA ISKA ILAALI OO FEEJINGNOOW

Kireystayaasha Guryaha:

Maku heystaan dhibaatooyinka kululeynta guriga? Marka hore, u dig milkiilaha gurigaaga. Haddii milkiilaha gurigaaga uusan kuu soo jawaabin, wac 3-1-1 si aad warbixin u gudbiso.

Milkiilayaasha guryaha:

Ma u baahan tahay in lagaa

Gudbiso arjiga caawimada ee Barnaamijka Kaalmada Tamarta

Guryaha Dakhligooda uu Hooseeyo ee Gobolka (LIHEAP). Booqo boston.gov/home-heating ama wac 617-357-6012.

Guryahay waa in lagu kululeeyaa:

68° Maalintii
7 am - 10:59 pm

64° Habeenkii
11 pm - 6:59 am

Qof walboow:

- Weligaa foornadaada ha u isticmaalin inaad ku kululeyso ama diiriso gurigaaga qabow dartiis.
- Space Heaters (Qalabka kululeeyayaasha la qaadi karo ee guriga) waxay sababi karaan dab inuu kaco, sidaa darteed ha dhigin daahyada agtooda ama waxyaalaha dabka qabsan kara. Xusuusnow in aad damiso ka hor inta adan seexan.
- Nadiifi hawo-mareenada qiiqa si aad uga fogaato sumowga Kaarboon monoksaydh
- Hubi in ay shaqeynayaan qalabka lagu baaro kaarboon monoksaydhka iyo kan qiiqa.

QASHINKA IYO WAXYAALAHA DIB LOO WARSHADEEYO

Inta lagu jiro dabaylaha daran ee barafka, aruurinta qashinka iyo waxyaalaha dib loo warshadeeyo ayaa la baajin karaa. Inta badan, dabaylaha daran ee barafka waxay sababi karaan dib u dhac ku yimaada adeegyada kala duwan, sidaas darteed waxaan kaa codsaneynaa in aad na fahanto oo noo dulqaadato.

Si aad u aragto jadwalka waxyaalaha dib-u-warshadaynta iyo qashinka ee xaafaddaada iyo si aad u ogaato waxyaalaha dib looga warshadayn karo ee Magaalada Boston, fadlan:

- [booqo boston.gov/trash-day](http://booqo.boston.gov/trash-day)
- soo deji abka Trash Day (Maalinta Qashinka), ama
- wac 3-1-1

Shaqaaluhu way ku adagtahay inay gaaraan fuustooyinka qashinka iyo kuwa lagu rido waxyaalaya dib loo warshadeynaayo oo la dhigo gadaasha meelaha barafka uu tuulan yahay. Fadlan nadiifi aagga wadadda dhinaceeda ah ee gurigaaga si wax looga aruuriyo ama dhig weelasha qashinka meel u dhow meelaha barafka uu tuulan yahay ama meel hortooda ah.

Waxaan uruurinaa geedaha Kirismaska si loogu farsameeyo compost laga bilaabo Diseembar 29 - Janaayo 9. Ha ku ridin bacaha balaastiga ah. Fadlan ka saar waxyaalaha lagu celiyo iyo kuwa lagu sharaxo geedka Kirismaska. Haddii aad leedahay laba maalmood oo lagaa qaadayo waxyaalaha dib loo warshadeeyo, waxaan ururinnaa geedaha kirismaska maalinta qaadista waxyaalaha dib loo warshadeeyo ee ugu horreysa ee toddobaadka. Dhig geedkaaga wadadda dhinaceeda ee gurigaaga ka hor 6:00 subaxnimo.

LA TACAALIDA WADOOYINKA BARAFKA KU DA'AY

Naga caawi in wadooyinka ay ahaadaan kuwo u furan gawaarida barafka qaada iyo kuwa gurmada adiga oo ku baakimayo baabuurkaaga ugu yaraan 6 mitir meel isgoysyada u jirta oo aan ugu badnaan hal talaabo ka fogayn marshibiyeedka. Ha ku goynin gaarigaaga marshibiyeedka, tubooyinka biyaha dab-damiska waddada, meelaha laga koro marshibiyeedka, jidadka baaskiilka, jidadka baabuurta ee gurida, ama laamiga.


Inta lagu jiro xaalad degdeg ah oo baraf di'itaanka, dadka heysta valid resident parking sticker (ruqsadda baarkinka daganaha oo shaqeyneyso) ayaa qiimo dhimis baarkin ah ka heli kara garaashyada. Qiimo dhimista Baarkinka waxay bilaabanaysaa laba saacadood ka hor bilowga xaalada degdega ah ee baraf di'itaanka waxayna dhamaanaysaa laba saacadood kadib. Ma ogolin in gawaarida lagu baakimo fiidkii iyo habeenba meelaha lagu baakimo baabuurta Dugsiyada Dowladda ee Boston inta lagu jiro xilliyada uu barafka da'o.

Booqo boston.gov/snow si aad u ogaato meel aan gawaarida lagu baakimi karin inta lagu jiro xaaladaha degdeg ah ee xilliyada uu barafka da'o. Sidoo kale waxaan heynaa macluumaadka garaashyada qiima dhimista ku sameeyay baarkinka.

Ma waxaad korontada u isticmaashaa inaad guriga ku kululeyso? Tixgeli inaad iska diiwaangeliso Barnaamijka Doorashada Korontada ee Bulshada Boston (BCCE) si aad u hesho koronto aan qaali ahayn. Wac **3-1-1** ama booqo boston.gov/energy si aad u hesho macluumaad dheeri ah.

Qalabyada lacag bixinta baarkinka waa kuwa shaqeynaya xitaa inta lagu guda jiro xaaladaha degdega ah ee baraf di'itaanka.

Ka dhig ruqsadaada baarkinka daganaha (resident parking sticker) mid la arki karo 24 saac gudahooda kadib dhamaadka duufaanta.



Ka nadiifi dhamaan barafka ugu yaraan in u jirta hal talaabo hareeraha qeylo yareeyaha baabuurka ka hor inta aadan daarin gaarigaaga.

Tikitka ganaaxa ayaan u jari doonnaa oo waan jidi doonnaa gaarigaaga haddii aad ku baakinto wadooyinka waaweyn oo ay ku dhegan yihiin calaamado ku qoran in baarkinka aan laga ogoleyn sababo la xiriira xaaladaha degdega ah ee baraf di'itaanka inta lagu jiro xaaladaha degdeg ah ee markaa lagu dhawaaqay.

Xusuusnow inaad nadiifiso tubooyinka biyaha dab-damiska waddada iyo meelaha ay biyaha ku qulqulaan ee laamiga.

Ka leexi dhinacyada waddada waxyaalaha lagu ilaashado meelaha lagu baakimo gawaarida 48 saacadood gudahood ka dib markii xaaladda degdega ah ee barafka di'itaanka uu dhamaado. Fadlan ogow: waxyaalaha la dhigo dhinacyada waddada si loogu ilaashado baarkinka lagama ogola South End ama Bay Village.